



## Fariinta Abriil 20keeda ee Ardaydu Bannaanbaxeen

Bulshada Dugsiyada Dadweynaha Portland ee Qaaliga ah

Fadlan waxaan idinla socodsiinayaa iskaashigii aan la sameynay maamulayaasha iskuulada, hoggaamiyaasha firfircoon ee dugsiyada degmada oo si dhow ugu guur galayey boqolaal ardayda dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sarre oo bannaanka uga baxay dugsiyadeena si ay qeyb uga qaataan mudaharadaadka wadanka oo dhan ka dhacayey ee lagaga soo horjeedo rabshadaha iskuulada ka dhaca. Waxaan aad ugu faraxsanahay in aad idhaahdo markii aan dhammaan helay warbixinihii, mudaharaadkani wuxuu ahaa mid ku dhacay si jawi nabadgelyo iyo isqadarin leh oo aanay jirin wax dhib ah oo weyn oo la sheegay oo dhacday. Iyada oo hawlaha tallaabooyinka mudaharaadkani bannaanka ardaydu ugu baxay aanu ahayn mid dugsiyada degmadu ay soo abbaabuleen, waxaan jecelahay inaan idin soo gaarsiiyo mahadnaq daacadnimo ku jirto oo aan ugu mahadnaqayo cidii dhammaan ka caawisay sidii ay ardaydeenu u noqon lahaayeen kuwa nabada ah, laga bilaabo ardayda naftooda oo ahaa kuwa si fiican u habeynsaa, u deganaa iyo iyaga oo dhammaantoodna ka qeybqaateen. Dadkii kale ee caawiyey ardaydeena waxaa ka mid ahaa Ciidanka Nabadgelyada Booliska Portland, Shaqaalaha Nabadgelyada Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyo shaqaale kale oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland. Dhammaantiin waad mahadsan tihiin.

Mudaharaadkaasi wax oggolaansho ah ma siin Dugsiyada Dadweynaha Portland ama ma saarin wax xayiraad ah, iyada oo aan doorbideynay in ardaydu ku sugnaadaan dhismayaasheena iskuulada inta lagu gudo jiro maalin-waxbarasheedka si ay wax u bartaan iskuulada oo ah meesha aan ku xaqiijin karno nabadgelyadooda. Waxaan sidoo kale aqoonsanahay in ardaydeenu ay leeyihiin xuquuqda ah inay cabiraan xoriyadooda hadalka.

Masiibada korodhka rabashadaha iskuulada ka dhacdaa waxa ay noqotay arrinta ugu adag ee ay waajahaan sida macalimiinta, waalidiinta iyo gaar ahaan ardaydu. Waa in aan dhageysanaa waxa ay ardaydeenu inoo sheegayaan- nabadgelyo ayey rabaan, la taageero ayey rabaan, ugu dambeyntiina waxa ay rabaan la soo dhaweeyo marka ay soo galayaan fasaladooda. Waxaan sii wadi doonaa sidii aan ula shaqeyn lahaa dhammaantiin sidii aan u meelmarin lahaa higsiga Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Waxaan nahay kuwa u addeega ardaydeena,

Guadalupe Guerrero  
Guddoomiyaha Waxbarashada